Qofkii Ilaahay khayr la doono wuu asiibaa

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Qofkii Ilaahay khayr la doono wuu asiibaa."

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Albukhaari]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Ilaahay haduu la doono khayr Qof Adoomadiisa Muuminiinta ah, wuxuu itaxaan kaga rido xaga Naftooda, Maalkooda, Ehelkooda, Muumniintu waxay ka helayaan arinkaa inay Ilaahay magan galaan oo baryaan iyo in loo danbi dhaafo darajadoodana kor loo qaado.

https://sunnah.global/hadeeth/so/show/4204